Taariikhda: 2021-10-07
Dnr: ÄN 2021-596
Waxa sameeyey: Social-och omsorgsförvaltningen

# Waxyaalo macluumaad ah, Kormeerka dhijitaalka muuqaal ahaaneed iyadoo la isticmaalaayo kamarada amniga ee adeegga guriga.

## Qaybta 1 - Macluumaadka ku saabsan waxqabadka kormeerka kamarada dhijitaalka muuqaalka ah

Waxa bishii Juunyo 2021 ay Äldrenämnden ee kamuunka Linköping gaartey go'aanka ah in waxqabadka illaalada habeenkii lagu sameeyo isagoo dhijitaal muuqaal ahaana ah oo kamarada amaanka la isticmaalaayo. Kiisaska ay degmadu ku qiimeyso in kormeerida habeenkii la sameeyo iyadoo la isticmaalaayo kamarada kormeerka ee dhijitaalka ah aanay suurtagalka ahayn, ayaa waxqabad kale loo ogolaanayaa.

Taasi ujeedadeedu waa:

- Si looga qaybqaado qashqashaad la'aanta hurdada habeenkii.
- La sii ilaaliyo ammaanka iyo asturnaanta dadka waaweyn, tayada daryeelka ayaanay saameyn ku yeelin doonin.
- Dhimista safrida shaqaalaha adeegga daryeelka guriga.
- Awooda shaqaalaha loo gacan baneeyo si taasi loogu heli karro waxqabadyo ka sii baaxada weyn, halkaas oo booqashada tagitaanka tooska ahi ay lagama maarmaan tahay.

### Sidee ayuu kormeerka dhijitaalka Muuqaalka ah ee kamarada ammaanka la kaashanayaa u shaqeeyaa?

Sida ku salaysan go'aankaaga kaalmadaada iyo baahidaada ayaad adiga iyo adeeggaaga gurigu go'aansan doontaan waqtiyada kormeerka dhijitaalka muuqaalka ah la sameyn doono. Kooxda samofalka ee kamuunka Linköping ayaa adiga kula soo xiriir doonta si ay kamarada ammaanka ugu xiraan gurigaaga, iyagoo soo maraaya sida waafaqsan dariiqooyinka wada xiriirka ee uu adeeg daryeel guri bixiyahaagu soo sheegay. Waxa kamarada amaanka loo jeedin doonaa jihada goobta aad seexato.

Shaqaalaha ka socda xarunta alaarmka ee hawsha u qabta Äldrenämnden ee kamuunka Linköping ayaa waqtiyada lagu heshiiyey sameyn doona kormeerka dhijitaalka ah. Wakhtiga kale ayay kamaradu xiran tahay. Waqtiyada kormeerku waa waqtiyo qiyaas ahaan ah. Haddii shaqaalaha xarunta alaarmku marka uu kormeerka dhijitaalka muuqaalka ah sameynaayo aanu ku arkin ayaa kormeerid kale la sameyn doonaa qiyaas ahaan 15 daqiiqo ka dib. Haddii aan weli lagu arkeynin taas ka dib ayaa shaqaalaha xarunta alaarmku la soo xiriiri doona adeegga daryeelka gurigaaga. Waxa uu markaa adeegga daryeelka gurigu sameyn doonaa kormeerid uu meesha ku imanaayo ama talaabooyinka kale ee lagu heshiiyey ee adiga iyo adeeggaaga daryeelka guriga idinka dhaxeeya. Waxay daaqada/fursada kormeerida dhijitaalka muuqaalka ahi furan tahay ugu badnaan 30 daqiiqo/wakhti la qabsaday. Wax cod ah oo lama duubaayo, wax sawiro ahna lama kaysanaayo.

Macluumaadka ku saabsan kamarada amaanka: si ay kamarada amaanku ugu hesho aag kormeerid/ilaalo ahaaneed oo ka weyn ayay 180 digrii  labada dhinacba ugu wareegi kartaa. Waxa isha kamarads loo jeedin karaa dhinac/kore marka aan kormeerida dhijitaalka muuqaalka ah aan la samayneynin.

Adeegga kormeerka dhijitaalka muuqaalka ah ayaan u keeni doonin qofka go'aanka caawimada ee kormeerka habeenkii haysta wax kharash dheeri ah. Waxaad bixinaysaa sida waafaqsan heerka caadiga ah ee kharashka daryeelka guriga ee kormeerka. Kamuunka Linköping ayaa qalabka kugu deymin doona kharash la'aan. Waxaad had iyo jeer xaq u leedahay inaad si buuxda uga soo horjeesato kamaradda amaanka iyadoo aad markaasna ka baxayso/lagaa reebaaoyo isticmaalka kamada amniga. Markaas ayaa baahidaada si kale loogu dabooli doonaa. Wixii su'aalaha/codsiyada ah kala xiriir cida bixisa adeegga daryeelka gurigaaga.

## Qaybta 2 - Macluumaadka ku saabsan maareynta xogta shakhsiga ee dabosocota kormeerka kamarada dhijitaalka muuqaalka

Waxaad haysataa komeerka kamarada dhijitaalka muuqaalka ah sidaa darteed ayaa laguu siiyey calaamad ay ku qoran tahay inay kamarada amnigu gurigaaga ku taalo. Waxa muhiim ah in calaamadaada la dhigo si ay dadka ku soo booqda ugu arki karaan inaad kamarada amniga haysato. Marka calaamada laga reebo ayaanu xitaa macluumaadkan bixineynaa kaas oo aad xaq u leedahay sida ku xusan Xeerka Ilaalinta Xogta (dataskyddsförordningen ama GDPR).

Kamarada kormeerida dhijitaalka muuqaalka ahi waxay ka dhigan yahay in macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed ay maareyn doonto Äldrenämnden ee kamuunka Linköping. Waxa maareynta macluumaadka shakhsiga loo sameynayaa waxa ka mid ah iyadoo ay ujeedadu tahay in lagu siiyo waxqabadka go'aankaaga laguu soo ogolaadey ka midka ah. Waxa gundhig sharci maareynta macluumaadka shakhsiga u ah waa danta guud.

Sawirada kamarada amaanka ayaan la keydin doonin iyadoo aan wax cod ahna la duubi doonin. Keliya shaqaalaha ogolaanshaha u haysta ee ka tirsan hawl-wadeenada uu kamuunku heshiis la galay ayaa sameyn kara kormeerka dhijitaalka muuqaalka ah.

Waxaad leedahay dhowr xuquuqood sida Xeerka Ilaalinta Xogta ku xusan. Waxaad xaq u leedahay inaad anaga nala soo xiriirto haddii aad rabto inaad hesho macluumaad ku saabsan xogta aanu kaa maareyno. Waxaad sidoo kale noola soo xiriiri kartaa si aad saxitaan ugu codsato, si aad ugu codsato inaan xadidno maareynta, si aad uga soo horjeedsato ama aad ugu codsanto tirtirista macluumaadkaaga.

Waxaad xitaa xaq u leedahay inaad kala xiriirto hay'ada kormeerka, Hay'adda Ilaalinta Asturnaanta (Integritetsskyddsmyndigheten), waxii cabasho ah ee aad qabto.

**Macluumaadka xiriirka**
*Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan maareynta xogta shakhsiga, ayaad la soo xiiriiri kartaa Äldrenämnden ee kamuunka Linköpings kuwaas oo ka masuul ah xogta shakhsiga.*

Macluumaadka xiriirka ee äldrenämnden waa:
Lambarka telefoonka: 013-20 62 82
E-maylka: aldrenamnden@linkoping.se

*Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku sabsan xuquuqdaada sida waafaqsan Xeerka Ilaalinta Xogta (GDPR), wayaad la soo xiriiri kartaa Wakiilka Ilaalinta Xogta (dataskyddsombudet).*

Macluumaadka xiriirka ee D*ataskyddsombudet waa:*
Lambarka telefoonka: 013-26 26 42 E-maylka: dataskyddsombud@linkoping.se